



TALO IYO WARBIXIN KU SAABSAN ANTIBIYOOTIKADA IYO CAABUQYADA (INFEKSHANKA)

Talo ku socota waalidka oo ku saabsan (Imbetaigoo)

'Imbetaigoo' waa infekshan ka-soo bax finan yaryar oo isku urursan, oo biyo leh oo markay dilaacaan yeesha qolof huruud ah oo dusha ka saaran kuna dhaca oogada maqaarka. 'Imbetaigado' inta badan waxay ku dhaca caruurta da'da xanaanada ku jirta. Nooca 'imbetaigada' ugu badani waa nooc qofku yeesho qolof huruud amma jaale ah oo ku dul fadhidha maqaarka ka hooseeya oo casaaday. Infekshankaan waxa sababa bakteeriya loo yaqaano istafiyilokoker ama istrebtokoker.

Waxay inta badan ka soo baxaan wejiga laakiin meal walba oo jidhka ah way ka soo bixikaraan. Bakteeriyyadu si fudud ayay meal u qabstaa, markay hesho maqaar cadanyeeysan oo soyocsan. Sidaa awgeed, waxa inta badan cudurkan u nugul caruurta yaryar ee leh caanbaaraha. Waxa muhiim ah caruurta sidaas ah in loo mariyo kiriim jilicya maqaarka, haddii uu wax ka tariwaayana, marka dambana, la isticmaalo kiriim Kortisonkräm leh.

Is dhalan-roggaa yaryar ee maqaarka lagu arkikaro sidooda ayay iskaga tegikaraan marka lagu nadiifiyo biyo iyo saabuun. Haddii se is dhalan-roggaa maqaarku intaa ka weeynyahay, waxa la is-marin kara antibiyootikada kiriim ah, afka laga qaadankaraa antibiyootikada kiniinka ah ama nooca la caboo.

Sida loo dawweeyo

Marka is dhallanrog yaryar lagu arko maqaarka meesha qooy oo si fiican meesha ugu nadiifi biyo iyo saabuunta nooca dareeraha ah, laba jeer maalintii, aroortii iyo galabiiba, ilaa intay qoloftaasi baaba'ayso. Waxa kale oo dhayidda/daweynta meelaha qoonmay lagu dhameystirkaraa in la isticmaalo dawada lidiga ku ah bakteeriyyada ee loo yaqaan 'klorhiksidiin'-ta dareeraha ah (Klorhexidinlösning) oo natijjo fiican keenikarta.

'Klorhiksidiinta' waxaad ku iibsankartaa qoraal dhakhtar la'aan. Dawadaasi ilaa todobaad aaya la isku eegikaraa. Haddii ay nabaradaasi intaa ku bogsanwaayaan amma ay

sii fidaan ha lala xidhiidho rugta daryeelka caafimaadka. Markaas bay tahay in laguu qoro antibiyootikada dhiiqada ah. Dhiiqadaasi ha la is mariyo maalin walba laba jeer muddo ku siman 5 cisho.

Haddii ilmahagu yeesho ka soo baxyo ku fiday jidhka amma 'imbatigada' oo ka sii dartay, la xiriir xarunta caafimaadka waxa xataa mararka qaarkood la siinkaraa antibiyootikada la kabado amma nooceeda kiniinka ah.

Ma fiicna in dawooyinka antibiyootikada la iska qaato. Waxa dhicikarta in antibiyotikadu kaa idleeyso nooca baakteeriyyada jidhka waxtarka u leh. Waxa kale oo iska qaadashada antibiyootikadu kugu keenikarta dhibaattooin ay ka mid yahiin shuban iyo finan ka soo yaaca oogada. Waxa intaa dheer, in iska-qaadashada antibiyootikadu sababto inay bakteeriyyadu u barato oo ay yeelato u-adkeeysi (resistenta). Haddii taasi dhacdo, waxa imanaysa in antibiyootikadu marka dambe waxba ka tariweydo caabuqyada halista ah ee bakteeriyyadu keento ee aad run-ahaan ugu baahakartid in antibiyootika lagaga daweyyo.

Ka hortag fiditaanka kala qaadista cudurada

Waalidka iyo caruurtuba waa inay ku dadaalaan inay faraxashaan had iyo jeer. Weliba ha la isticmaalo' isbiirtada' lagu fara-dhaqdo. Ha la iska dhawro in dheecaanka ka-soo-baxyada gacanta toos lagu taabto. Istimmaal nooca tuwaalada amma shukumaanada ee marka qudha la isticmaalo. Ilmaha cidiyaha ka gur oo ka ilaali inuu ilmuu is-xagto ama uu xoqo ka-soo-baxyada.

Ilmaha dharka iyo galka barkimada had iyo jeer ka bedel. Waxa kale oo aad hadba ka bedeshaa cadayga iyo mujuruca (Nappar). Ku dadaal inaad had iyo jeer masaxdid oo aad dhaqdid alaabada ilmuu ku ciyaaro iyo weliba waxyaalaha kale ee ay ka mid yihiin handraabyada alaabda lagu furo/xidho ee ilmuu gacanta la gaadhikaro.

Caruurta da'da xanaanada ku jirta, waa in guriga lagu hayaa ilaa intay si fiican u ingageyaan nabarado. Caruurta waaweyn ee fahamsan inay muhiim tahay in si fiican loo faro-dhaqdo, iyagu way tegikaraan dugsiyada.